

Xajka

Iyo Ac-maasha la qabto
@2006



Buugaan waxaa loogu talo galay qofka rabo inuu soo xajiyo, wuxuu ka helayaa dhamaan ac-maasha laga rabo inuu la yimaado.



Waxaa Qoray: C/qani M. Cali xagaa –Qardhaawi-

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته

الحمد لله الذي بعث محمدا صلى الله عليه وسلم بالهدى ودين الحق رحمة للعالمين وقدوة للعاملين وحجة على من أرسله الله إليهم أجمعين وأشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له إله الأولين والآخرين وأشهد أن محمدا عبده ورسوله المصطفى على العالمين صلى الله عليه وعلى آله وأصحابه ومن تبعهم بإحسان إلى يوم الدين وسلم تسليما كثيرا
أما بعد

Marka hore waxaa ilaah mahadii ah in allaah noo fududeeyey inaan wax ka taabano ac-maasha qofka looga baahan yahay inuu la yimaado marka uu gudanayo xajjka, arintaa waxaa nagu baraarujiyey markii aan aragnay in dadka baahi u qabaan gaar ahaan dadka ku nool wadamada qurbaha.

Si ay dadku u fahmaan waxaan soo qaadanay sawiro tusinaya ac-maasha la rabo in la qabto, sawiradaa waxaan ka soo qaadanay mid ka mid ah shabakadaha islaamiga ah, waxaana hubiyey sheikh Cabidlaahi ibn C/raxman Al-jibirin.

Waxaan ilaahay ka baryeynaa inuu naga ajar siiyo, qofkasta oo qaatana ilaaahay ku anfac.

Haddii aad rabto inaad soo gudbiso faa-faahin ama talo soo jeedin nagala soo xiriir telefoonka 612-275-2512 ama soo dir email; qardhaawi@yahoo.com

C/qani M. Cali xagaa – qardhaawi-

Intaa ka bacdi waxaa halka ku soo koobaynaa acmaasha looga baahan yahay qofka raba inuu soo xajiyo xiliga uu samaynayo acmaasha xajka.

Marka hore xajjku waa mid ka mid ah tiirarka islaamka, sida uu nabigu nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee uu u yir: islaamka waxaa lagu dhisay shan tiir¹ oo kala ah:

1. in la qiro ilaahay mooye inaanu jirin ilaah xaq lagu caabudo, Maxamedna (SCW) uu yahay rusuulkiisii
2. in la oogo salaadda
3. in la bixiyo sakada (cidii ay waajib ku tahay)
4. in la soomo bisha ramadaan
5. in la xajiyo baytka ilaahay(qofkii awooda)

sidoo kale ilaahay ayaa ummadda uga dhigay farad(waajib) sida uu quraanka ku yiri:

مِينَوَلِّلَّهِ عَلَى النَّاسِ حِجُّ الْبَيْتِ مَنِ اسْتَطَاعَ إِلَيْهِ سَبِيلًا وَمَنْ كَفَرَ فَإِنَّ اللَّهَ غَنِيٌّ عَنِ الْعَالَمِ

Ilaahay wuxuu ku waajibiyey dadka in ay xajiyaan qofkii awooda, qofkii diida ilaahay wuu ka maarmaa caalamka oo dhan.

Nabiguna nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee wuxuu xajiyey hal mar² wuxuuna cimraystay afar jeer.

Nabiguna wuxuu xadiis ku yiri:

إِنَّ اللَّهَ عَزَّ وَجَلَّ فَرَضَ عَلَيْكُمُ الْحَجَّ فَحُجُّوا

Ilaahay wuxuu idinku waajibiyey inaad xajidaan ee xajiya.

Waxay culumadu leeyihiin qofkii awooda oo aan soo xajiyin, ama dib udhiga cudurdaar la'aan wuxuu qofkaasi ku dhacay dambi aad u wayn.

Wuxuu nabigu xadiis kale ku baraarujiyey in ay dedijiyaan xajinta ay xajinayaan wuxuu ku yiri xadiis ay warinayo imam axmed³ “dadoow dadajiya xajka haddii aad awoodaan qofkiin ma oga waxa ku dhici doona”.

Fadliga uu leeyahay Xajjku

Waxaa nabigu noo sheegay fadliga uu leeyahay qofka xajinaya, wuxuuna nabigu(scw) leeyahay:

الحجاج والعمار وفد الله دعوه فأجابهم، وسألوه فأعطاهم،

¹ Shanta tiir islaam

² Waxay ahayd sanadkii 9aad ee hijrada, waxaana xajjkaa loo yaqaan (xajatul wadaac)

³ Axmed ibnu xambal ayaa ku wariyey musnadkiisa

Xadiiska macnihiisu waa sidan: dadka xajjka u socda iyo kuwa cumraysanayaa waa wafdi u socda ilaahay, ilaah ayay baryeen wuuna ajiibay, waxbay waydiisateen wuuna siiyey⁴. Waxaa kale oo fadligiisa ka mid ah in uu nabigu noo sheegay in xajjku qofka ka tirtiro dunuubta kana ilaasho faqriga iyo saboolnimada, Wuxuu nabigu (scw) xadiis uu warinayo Ibnu-masnuud ku yiri:

Xadiiska macnihiisu waa sidan: is raacsiya (badiya) xajjka iyo cumrada, labaduba waxay qofka ka tirtiraan dambiyada, waxayna ka ilaashaan faqriga(saboolnimada), sida birta ama dahabka ama qalinka marka dab la galiyo ay wasakhda(sida daxalk) uga dhacaan, qofka xajjka sida wanaagsan u guta waxaa lagu abaal marinayaa JANNO, qofkii gabbalku u dhaco isagoo MUXRIM ah waxaa laga dhaafaa dambiyada oo dhan⁵.

Shuruudaha Xajjka

Xajjku wuxuu leeyahay shuruudo laga doonayo in laga helo qofka soo xajinaya, shuruudahaas oo ah shan shuruudood oo kala ah:

- in uu qofku muslim yahay
 - in uu qofk caqli qabo oo aanu waalnayn
 - in uu qaan gaar yahay (haddii qof aan qaan gaar ahayn uu soo xajiyo waa ka ansaxayaa laakiin waa inuu soo xajiyaa markii uu waynaado. Maalin ayaa haweeney nabiga ilmo ula timi waxayna tiri kani xajj ma lugu leeyahay, nabigu wuxuu ku jawaabay “haa, adiguna ajar ayaad ku leedahay”⁶.
 - Inuu qofku xor yahay.
 - Inuu qofku awoodo xajjka sida inuu saad haysto iskana bixin karo kharajk xajjka.
- Qofkii laga helo shuruudaha aanu soo sheegnay waxaa lagu leeyahay ama waajib ku ah in uu xajjiyo.

Shuruudaha Dumarka gaarka u ah

Sida aynu wada ognahay xajjku wuxuu waajib ku yahay rag iyo dumarba laakiin shuruudaha aynu kor ku soo sheegany dumarka waxaa u dheer hal shardi oo laga doonayo in la helo si uu qofka dumarka ah xajkii waajib ugu noqdo, shardigaas oo ah

⁴ Waa xadiis saxiix ah

⁵ Waxaa wariyey Tirmidi, Nisaa’i, Ibn-majah.

⁶ Waxaa wariyey Muslim

in la helo MAXRAM⁷, maxaa yeelay ma banaana in qofka dumarka ahi uu safro iyadoo aan haysan maxram.

Wuxuu nabigu (scw) yiri

لا تسافر المرأة إلا مع محرم ، ولا يدخل عليها رجل إلا ومعها محرم

Xadiiskaas macnihiisu waa: ma safarto haweenay ilaa uu la socdo Maxram maahee, nin yaanu u galin haweenay ilaa inuu maxram la joogo maahee.⁸

Xadiis kale ayaa wuxuu ahaa sidan:

وقال رجل للنبي صلى الله عليه وسلم : إنني أريد أن أخرج في جيش كذا ، وامرأتي تريد الحج ، فقال : أخرج معها

Xadiiska macnihiisu waa: nin ayaa nabiga (scw) wuxuu ku yiri waxaan rabaa inaan raaco ciidan baxaya oo jihaad aadaya, xaaskaygiina xajj ayay u socotaa, markaas ayaa nabigu wuxuu ugu jawaabay “Xaaskaaga raac”⁹.

Axaadiistaan dhamaan waxay na tusayaan in ayan banaanayn in gabadhu aado safar MAXRAM la’aan.

Imaam axmed ibn-xambal ayaa wuxuu yiri:

المحرم من السبيل ، فمن لم يكن لها محرم ، لم يلزمها الحج بنفسها ولا بنائها

MAXRAM wuxuu ka mid yahay Sabiilka (ilayhi-sabiilan) haweenta aan haysan

MAXRAM xaj iyada iyo ciddii naa’ib ka ahba lagama rabo.

Xirashada Xajka

Marka koowaad qofka xajinayow waa in aad ogaataa in aad u socoto baytkii(gurigii) ilaahay oo aad tihiin wafti ku socda ilaahay xagiisa oo aad ku dhex jirtaan bisha xurmada leh soona gudanaysaan camal aad iyo aad ilaahay xagiisa ku wayn. Waxaad ogaataa in aan camalkaan lagaa aqbalayn ilaa aad la timaado labo shardi

1. Ikhlās: in aad camalka aad qabanaysid ka dhigto mid ilaahay aad ula jeedo oo ka ilaaliso is tuska ama ha lagu yiraado xaj buu u socdaa/socotaa

⁷ Qof gabadha la xiriira sida ninkeeda, aabaheed, walaalkeed iyo qof kasta oo ayan u banaanayn inay guursato.

⁸ Waxaa wariyey Axmed sanad saxiix ah

⁹ Waxaa wariyey Bukhaari iyo Muslim

2. inaad kaga dayato nabiga nabad galyo iyo naxariis kor kiisa ha ahaatee oo aa ka ilaaliso inaad qabato waxyaalo bidco iyo wixii la mid ah (camalka aad samaynayso haddii aadan aqoon u lahay waydii dadka culumada ah ee aqoonta u leh).

Marka labaad qofka xajka aadayaa waa in uu isu diyaariyaa inuu galayo safar lagana doonayo inuu ogaado meesha uu ka baxayo meesha uu ka degayo (haddi uu diyaarad raacayo) maxaa yeelay waxaa nabigu sameeyo meelo gaar ah oo uu qofku ka xiranayo¹⁰.

Tusaale ahaan, dadka ka imaanaya magaalada Madiina waxay ka soo xiranayaan Dil xulayfa¹¹, dadka ka imaanaya dhinaca SHAAM waxay ka xiranayaan Juxfa, dadka ka imaanaya NAJDI waxay ka xiranayaan Qaran, dadka ka imaanaya YAMAN waxay ka xiranayaan meesha magaceeda la dhaho Yalamlam. Haddaba haddii aad adigu soo raacdo diyaarad oo aad ku timaado dariiq ku beegan intaa aan soo sheegnay waa inaad ka soo xirataa meesha ku beegan (sida badan shaqaalaha diyaaradda ayaa dadka wargaliya marka lagu beegan yahay meesha laga xiranayo). Haddaba su'aashu waxay tahay haddii aad dhaafto meeshii la rabay in laga xirto oo aadan xiran xajkii ama cumradii sidee baad yeelaysaa? Waxay culumadu leeyihiin haddii qofku dhaafto meeshii la rabay in laga xirto isagoo aan xiran xajka ama cumrada waa in uu qofku dib u noqdaa oo soo xirataa, haddii aanu noqon oo uu meel ka sokaysa ka xirto, waxaa laga rabaa inuu ku gowraco neef ari ah magaalada Maka al-mukarama¹² dhexdeeda oo uu u qaybiyo masaakiinta.

Waxyaalaha aan banaaneeyn **marka la xiranayo xajjka**

1. Ma banaana in madaxa uu daboolo qofka muxrimka ah¹³. Nabigu (scw) wuxuu ku yiri xadiis isagoo ka waramaya nin xajiyayey oo geeriyooday: dhaqa oo ku kafma laba maro madaxana ha ka daboolinina waxaa la soo saarayaa qiyaamaha isagoo

¹⁰ miiqaadka

¹¹ Meel magaceed

¹² Magaalada barakaysan ee uu qofu u aadayo xajjka

¹³ Qofka xajinaya

- talbiyaysanaya¹⁴. Xadiiskaani waxaa uu na tusayaa in ayan banaaneyn in madax la daboolo qofku markuu xirto xajjka ka bacdi.
2. Ma banaana in qofku isticmaalo waxyaalaha udgoon sida barafuunka marka uu xirto xajjka ka bacdi. Inta aadan xajka xiran qofku inuu qubaysto oo isticmaalo wax udgoon waa loo ogol yahay sida uu nabigu sameeyey oo ay Caaisho¹⁵(rc) nooga warantay laakin marka uu xirto ka bacdi lama ogola inuu isticmaalo barafuunka iyo wixii la mid ah.
 3. Ma banaana in qofku iska jaro cidiyaha iyo timaha markuu xirto xajjka ka bacdi ilaa uu ka gaaro xilliga xiirashada. **ولا تحلقوا رؤوسكم حتى يبلغ الهدى محله** Wuxuu ilaahy ayadan ku leeyahay ha xiirinina timihiina ilaa hadyigu ka gaari meeshiisii.
 4. Ma banaano galmado (ninka oo xaaskiisa u taga) markuu xirtay ka bacdi **فمن فرض فيهن الحج فلا رفث ولا فسوق ولا جدال في الحج** ilaahay wuxuu quraanka ku yiri: qofkii xirta xajjka yaanu la imaan jimaac(galmo), afxumo iyo dood.
 5. Ma banaana raggu inay xirtaan dhar la tolay sida jaakad, shaar, surweel iyo wixii la mid ah markuu xirtay xajjka ka bacdi umana banaana illaa inuu wax kale waayey mooyee.

¹⁴ Bukhaari iyo Muslim baa wariyey

¹⁵ Caa'isha binti abii bakar oo ah mid ka mid ah xaasaskii nabiga

Dharka la xirto iyo sida looxirto



Dharka la doonayo in la xirto (raga) waa laba go' (mid hoose iyo mid sare), iyo kabo.

Dumarka iyagu dhar u gaar ah ma leh, waxay gashanayaan dharka ay doonaan oo aan muujinayn jirkooda, kan raggana aan u ekayn.


Qofku markuu xirto xajjka waa inuu akhriyaa adkaarta soo aroortay oo ah:

{ Labayka laahuma labayka, laa shariika laka labayka, inal xamda, wa nicmata laka walmulka laa shariikha laka }

Raggu codkja kor ayaay u qaadayaan, dumarkuse hoos ayay u akhrinayaan.

Cimrayso siddeda bisha ka hor

Marka aad tagto magaalada Maka-al-Mukarama maalinta sideedaad ee bisha ka hor waxaa fiican inaad Cimraysato oo aad la timaado cimro xajjka ka hor.



Marka qofku soo gaaro magaalada wuxuu aadayaa Kacbada wuxuuna joojinayaa talbiyada (adkaartii uu akhrinayay), go'ii sare uu watay ayuu jeeniqaarsanayaa¹⁶, ka dib wuxuu qofku salaamayaa Xajarul-aswadka wuuna dhunkanayaa haddii ay suurta gal u noqoto wuxuuna oranyaa Allahu Akbar¹⁷. Haddii aanu awoodin inuu dhunkato ciriir jira awgeed gacanta ayuu ku taabanayaa wuxuu dhunkanayaa gacantiisa, haddii aanu awoodin inuu taabto xageeda ayuu u jeesanayaa wuxuuna u taagayaa gacantiisa midig dhinaca kacbada.

Dawaafka Kacbada

Ka dib qofku
wuxuu ku
dawaafayaa kacbada
todoba jeer,
wuxuuna ka
bilaabayaa xajarul
aswadka isaguuna
ku soo

¹⁶ Sida sawirjka ka muuqata garabka midigna wuu muujinayaa, ka bidixna wuu qaridayaa

¹⁷ Sida Bukhaari wariyey



dhamaynayaa .
waxaa haboon
qofku inuu weesa
qaato inta aanu
bilaabin dawaafka
(wareega lagu
wareegayo
kacbada)

Meesha u dhaxaysa Xajarul Aswadka iyo Ruknul Yamaaniga waxaad oranaysaa

{Rabanaa Aatinaa fi dunyaa xasanatan, wa fil aakhirati xasanatan waqinaa cadaabu naar}.

Markuu qofku dhameeyo dawaafka wuxuu aadayaa Maqamu Ibraahimka, wuxuuna gadaashiisa ku tukanayaa laba rakcaddood, waxaa sunne ah in la akhriyo labada suuradood ee kala ah {Qulyaa ayuhal kaafiruun} iyo {Qul huwa laah}. Haddii aad ku tukan waydo maqamu ibraahimka gadaashiisa ciriir jira awgeed wuxaad ku tukanaysaa masaajidka meeshii kale aad ka hesho.

Markaad tukato ka bacdi waxaa sunne ah inaad cabto biyaha samsamka ah, dabadeed waxaad aadaysaa dhinaca xajarul aswadka si aad u salaamto waa haddii ay suurta gal tahay.

Sacyiga¹⁸ u dhexeeya Safa¹⁹ iyo Marwa²⁰

Intaa ka dib waxaad aadaysaa dhinaca buurta Safa (sida aad sawirka ku aragto), waxaa sunna ah inaad akhrido:


إِنَّ الصَّفَا وَالْمَرْوَةَ مِنْ شَعَائِرِ اللَّهِ فَمَنْ حَجَّ الْبَيْتَ أَوْ اعْتَمَرَ فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِ أَنْ يَطَّوَّفَ بِهِمَا وَمَنْ تَطَوَّعَ خَيْرًا فَإِنَّ اللَّهَ شَاكِرٌ عَلِيمٌ

¹⁸ Waa socod gaar ah oo u dhexeeya Safa iyo Marwa

¹⁹ Buur magaceed

²⁰ Buur magaceed

Waxaa sunne ah inaad buurta Safa dusheeda soo fiiriso qiblada, labada gacmood adoo kor u taagaya, waxaad akhrinaysaa:
الله أكبر الله أكبر الله أكبر ، لا إله إلا الله وحده لا شريك له ، له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير ، لا إله إلا الله وحده ، أنجز وعده ، ونصر عبده ، وهزم الأحزاب وحده ،
Intaa ka dib waxaa baridaa ilaahay si hoos ah waydiiso wixii aad doonto.



Intaa ka dib waad soo degaysaa oo waxaad aadaysaa dhinaca buurta Marwa, markaad gaarto buurta Marwa waxaa la rabaa in la fuulo buurta Marwa oo aad samayso wixii aad samaysay markaad joogtay safaa, sida gacmaha oo aad kor u taagto qiblada oo aad qaabisho, iyo inaad duco iyo dikri la timaado.

Markaad dhamayso acmaasha Safa iyo Marwa waxaad xiiranaysaa ama gaabinaysaa timaha, markaan inaad gaabiso timaha ayaa fadli badan. Dumarku inay xiirtaan maaha waxaa haboon in ay wax yar ka gooyaan timahooda.

Halkaa waxaa ku dhamaaday acmaashii cumrada, qofku waa xalaaloobayaa

Maalinta Siddedaa (YOWMU TARWIYA)

Marka la gaaro maalinta 8aad ee bisha dil-xijah(yowmu tarwiyah) wuxuu qofku xiranayaa xajjka meel kasta uu ka joogo Maka-Al-Mukarama, ka bacdi wuxuu aadayaa MINA, halkaa wuxuu ku tukanayaa Duhur, Casar, Maqrib, Cishe iyo Subaxda dambe, salaad walbana

wuxuu tukanayaa waqtigeeda isagoo soo gaabinaya salaadaha Duhurka, Casarka iyo Cishaha.

Maalinta Sagaalaad



Markay qoraxdu soo baxdo maalinta sagaalaad (9aad dil-xija) wuxuu aadayaa dhinaca CARAFA , waa meel ku dhegan MINA sida aad sawirka sare ka aragtid, waxaa haboon oo sunna ah in uu qofku dego meesha magaceeda la yiraahdo NAMIRA. Halkaa ayaad joogaysaa ilaa qoraxdu ay gaarto xilliga duhurka, waxaa halkaa lagu akhriyaa khudbo loogaga hadlo waxaa qofka xaajiga ahi uu samaynayo maalintaa iyo wixii acmaal ah oo la sameeyo maalmaha ka dambeeya maalinta carafo. Wuxuu tukanayaa duhur iyo casar iyagoo la jamcinayo oo la soo gaabinayo, waxaana la tukanayaa xilliga casarka. Ka dib wuxuu istaagayaa carafo meel kasta oo ka mid ah (BADNU-CURANO meehee meel kasta oo carafo ah waa meel la istaago²¹. Waxaa kale oo aad istaagi kartaa buurta caraf(JABALUL-CARAFA) gadaasheeda waana meesha nabigu istaagay²² sida aad sawirka hoose ku aragtid waxaad u jeedsanaysaa dhinaca qiblada waxaad ku dadaalaysaa dikri iyo duco.

²¹ Waxaa xadiska wariyey xaakim

²² Waxaa wariyey muslim iyo tarmidi



Wuxuu nabigu xadiis ku leeyahay {duco waxaa u fiican tan carafo, wax aan aniga iyo nabiyadii hore yiraahdeen waxaa u fadli badan – laa ilaaha ila laahu waxdahu laa shariika lahu lahu mulki walahul xamdi yuxyii wa yumiitu wahuwa cala kuli shay’in qadir²³}. Markay qoraxdu dhacdo waxay xujaydu aadayaan MUSDALIFA iyagoo u soconaya si degan aad xasilooni ku jirta aadna u badinaya inay akhriyaan talbiyada. Markay musdalifa gaaraan waxay ku tukanayaan MAQRIBKA oo ay tukanyaa saddex ragcadood iy CISHAHA ay tukanayaan laba rakcadood, wayna jamcinayaan hal eedaan (addan) iyagoo u addamaya mid walbana u aqiimaya. Waxay habeenkaa ku baryayaan xujaydu MUSDALIFA ilaa ay ka tukadaan salaadda subax, in ka dib waxaa sunna ah in ay istaagaan MASHCARIL-XARAAMKA agtiis iyagoo u jeeda dhinaca qiblada, badinaya digriga ilaahay iyo duco gacmahana kor u taagaan ilaa uu waagu ka dilaaco sida uu nabigu sameeyey²⁴. Nabigu wuxuu yiri {waxaan istaagay halkan laakin MUSDALIFA oo dhan waa meel la istaago²⁵.

Maalinta tobnaad (10aad DIL-XIJA) **iyo wixii camal ah oo ka dambeeya**

Marka waagu beryo maalinta 10aad waxaad sameeysaa arimahaan soo socda

- waxaad aadaysaa dhinaca MINA adigoo badaniya TALBIYADA,
- socodkana dedeji markaad gaarto WAADI-MUXASIR,

²³ Waxaa wariyey tarmidi

²⁴ Waxaa wariyey muslim

²⁵ Waxaa wariyey muslim

- waxaad aaddaa JAMRATUL KUBRAA (waa jamratul-caqabah)
- waxaad tuuraysaa todoba dhagax oo aad ka soo qaadatay MUSDALIFA ama MINA hadba kii aad ka heshay.
- Waa in dhagaxa aad tuuraysaa uu yahay mid aad u yar sida aad ku aragtid sawirka.



- Gacanta ayaad kor u qaadaysaa markaad tuuraysid adigoo oranaya ALLAAHU AKBAR sida sawirka sare ka muuqata.
- Markaad tuurato waxaad bilaabaysaa inaad gawracdo xoolihii (aad waday, waxaana sunne ah in aad wax ka cunto ka dibna aad sadaqaysato).
- Qofkii aan HADYI²⁶ wadin wuxuu soomayaa toban bari saddex ka mid ah wuxuu ku soomayaa intuu xajjka joogo, waxaa fiican in aad soonto malmaha 11aad, 12aad iyo 13aad, markaad ku laabato wadankaagii waxaa lagaa rabaa inaad soonto todoba bari.
- Waxaad xiiraysaa timaha,

Ogow: markaad tuurato JAMRATUL-CAQABA, TIMAHANA XIIRATO waxaa kuu bananaya wax walba oo markii hore kaaga xaaraansanaa xirashada xajjka marka laga reebo inaad la kulanto xaaskaaga, waxaana lagu magacaabaa TAXALUL AWAL. Intaa ka bacdi waxaad aadaysaa dhinaca MAKKA si aad u samayso dawaafka loo yaqaan DAWAAFUL-IFAADAH. Dawaafkan ka dib waxaa qofka xaalaal u noqonaya wax walba xataa Haweenka (xaaska), xaalaalowgaan ayaa lagu magacaabaa TAXALULU-TAAM.

Xusus gaar ah: waa inaad tuurataa jamaaradka saddexdaba marka ay qoraxdu bartamaha cirka ka suusho (xilliga Duhurka)²⁷, adigoo ku bilaabaya tan yar (Zuqraa), ku xejinaya tan dhexe (Wusdaa), u dambaysiinaya tan wayn (Kubraa ama jamratul caqabah), mid kastana ku tuuraya todoba dhagax oo yar yar sidii aan hore ku soo tilmaamnay ama aad sawirka hoose ku aragtid.

²⁶ Xoolaha la qalo

²⁷ Bukhaari ayaa wariyey (ibnu cumar)



Marka uu qofku ka faaruqo acmaasha xajjka ee aan soo tilmaamnay oo uu goosto inuu u noqdo wadankiisa waxaa waajib ku ah in uu sameeyo DAWAAFUL-WADAAC sida uu saxaabiga ibnu cabaas leeyahay waxaa nala amray inuu dawaafka baytku noqdo midka u dambeeya²⁸. Halkaa waxaa ku dhamaaday acmaashii xajjka.

Ilaahay waxaan waydiisanaynaa inuu noogu daro miisaanka xasanaadka maalinta qiyaamaha ee uu qofku u baahan yahay inuu xasanaad badan hormarsaday.

²⁸ Bukhaari iyo Muslin (waa laga fududeeyey gabadha caadada qabta)



Wixii talo soo jeedin ah ku soo dir
Abdighani M. Ali –qardhaawi–
P. O. Box 8593
Minneapolis, MN 55408
U.S.A
Tel: 612-275-2512
Email: qardhaawi@qardhaawi.com
Booqo: <http://www.qardhaawi.com>
@2006

